

# MAAREYNTA CAYAYAANKA

## CAYAYAANKA UGU BADAN EE BEERAHA



### Aphids

cagaar, cabbirka madaxa uu biin dhanyahay, caadiyana kooxkoox ayay u socdaan



### Doorshaanka Qajaarka

jaalle weeye leh mardimo madoow, 1/5 dheerar le'eg



### Doorshaan Duqsi

waa madoow ama barawn, boodbooda, cabbirka madaxa uu biin dhanyahay



### Dhiqle Bocor

jir midab cawl ah iyo xaglo leh, ukun cas ama liimi ah, cabbirkooduna yahay sidii shilin lacag ah

## SIDEE LOOGA HORTAGO

**DALAG ISKU BADBADALID:** Yeel inaad isku badbadasho dalagyadaada midba marna aad abuurto si aadan had iyo jeer u abuurin isla hal nooc oo geedo ah saynis ahaan adoo ku abuuraya isla hal goob oo beertaada ah xili ilaa xili kale. Tusaale ahaan, iska ilaali in aad tamaandhada ku beerto isla goobta aad basbaaska ku beertay xilli ka hor. Cayayaanku mararka qaarkood waxay ku nastaan ciidda xilliyadii hore la isticmaalay oo beerista dalagyo leh tayo la mid ah tayada dalagyadii hore waxay kordhin kartaa u nuglaanshaha cayayaankan.

**LABA DALAG OO KALA DUWAN ISKU AG ABUURID-DALAGYO ASXAAB AH:** Isku ag abuuridda geedo iskaabaya waxay lahaan kartaa faaiido labo jeer ah. Xoogaa geedo ah oo asxaab ah waxay soo jiidan karaan cayayaan faaiido leh, sida caawiyeyaasha mira dhalka geedaha, isla markaana waxay niyad jebin karaan cayayaanka dhibka badan.

**CALEEN SHAAHDA KOMBOSTIGA AH:** U adeegsiga komboosti caleen shaah ah geedahaaga waa sidii adoo siiyay geedahaaga nooleyaal caafimaadka kordhiya. Waxaa uu xoojiyaa xoogga habka difaaca dhirtaada waxaa uuna u ogolaadaa dhirtaada inay u adkeystaan duulaanka ama wax haddii ay soo weeraraan. Si loo kordhiyo sifooyinka ka hortagga cayayaanka ee shaaha kombosti, waxaad ku buufin kartaa caleemaha geedkaaga. Nooleyaasha ilu ma qabatada ah ee faa'iidada leh ee ku badan caleen shaaha kombosti waxay ka caawiyaan habka difaaca ee dhirtaada inuu weeraro nooleyaasha ilu ma qabatada ah iyo cudurrada waxyeelada leh.

CITY of **BOSTON**



Yaanyada iyo basil waa geedo asxaab ah.



GrowBoston

growboston@boston.gov

# SIDA LOO MAAREEYO IYAGA

**SOO JIIDO WAXA UGAARSADA:** Dhirta soo jiidata cayayaanka faa'iidada leh, sida caashoquruntada, ayeeyo tukatada, iyo xoonka dulinka ah waxay aad waxtar ugu yeelan karaan maaraynta cayayaanka. Cayayaankani wuxuu ugaadhsadaa dirxiga iyo cayayaanka beerta ee waaweyn waxayna caawiyaan dhimista tirada cayayaanka waxyeelada leh. Beeraha leh dhir kala duwan, oo ay ku jiraan geedo yaryar, cawska, iyo gaar ahaan dhirta ubaxa bixisa xilliga oo dhan, waxay gacan ka geysan karaan kordhinta tirada cayayaanka faa'iidada leh ee beertaada.

**SAF KASTA WAX KU DAD:** Polyester-kaan marada ah ee dunteedu isku gudgudban tahay waxay gaar ahaan wax u tartaa ka badbaadinta geedaha cayayaanka socsocda, sida doorshaanka iyo aboorka ama moths. Isticmaal maro kasii fudud oo safka lagu dado guga iyo xagaaga si aad u ilaaliso wareegga hawada iyo heerkulka dheellitiran ee ah geedaha dhexdooda. Xilliga jiilaalka, isticmaal dabool saf oo intii hore ka dhumuc weyn si aad ugu dahaarto dhirta.

**GACANTA KU SOO QAQABO:** Isku day inaad dusha ugala socoto cayayaanka si asbuucle ah. Haddii aad ka digtoonaato cayayaanka horaanta xilliga, saarista tooska ah ee cayayaanka ayaa waxay noqon kartaa hab maareyn oo wax ku ool ah oo kordhiya nololsha dhirtaada. Tani waa un in laga saaro dhiqle bocorka, diiratada wax googooyisa, doorshaanka qajaarka iyo ukumahooda dhirtaada oo lagu daadiyo biyo saabuun leh, taas oo sun u ah cayayaan badan.



## LIISKA WAXA LAGU BUUFINAAYO CAYAYAANKA EE DABIICIGA AH

### Maadooyinka ay ka kooban yihiin

- 1 rukun oo toon ah
- 1 basal oo yar
- 1 qaadada shaaha ah oo basbaas gaduud ah-budo weeye
- 1 qt oo biyo ah
- 1 qaado oo saabuunta saxuunta lagu dhaqo ah oo dareere ah
- 1 dhalo oo nadiif ah oo tan wax lagu buufiyo ah
- 1 calal oo kan burcadka lagu nadiifsho ah

Jarjar ama rif basasha iyo toonta. Intaa kadib biyo ku dar oo ku qas basbaas gaduudka budadiisa. Dheji hal saac oo cadaadi isku darka adoo isticmaalaya marada burcadka. Kudar saabuunta saxuunta lagu dhaqo oo dareere ah. Aad ugu buufi caleenta dhirtaada, xataa dhankooda hoose. Kuxaree isku qaska weel xiran oo firinjiiyeerka gali ilaa asbuuc.

**Ilaha:** Brooklyn Botanic Garden, NYC Parks GreenThumb, Cornell Cooperative Extension, Penn State Extension, UMass Extension Center for Agriculture, Food, and the Environment. Sawir Khiyaali ah oo ay Qortay Olivia Golden.